

Dheefaha WIC iyo SNAP

Ma ogtahay inay jiraan barnaamijyo kaa caawinaya inaad u hesho cunto caafimaad badan u leh qoyskaaga? Waxeey sidoo kale kaa caawin karaan in aad wax badan ka barato cuntada iyo naasnuujinta. Barnaamijyadan waxa lagu magacaabaa WIC iyo SNAP.

Barnaamijka Nafaqada Kabka ah ee Qaaska u ah Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (Women, Infants and Children, WIC)

Barnaamijka WIC wuxuu caawiyaa:

- Haweenka uurka leh iyo kuwa naasnuujinaya
- Haweenka dhawaan ilmo dhalay
- Dhallaanka iyo carruurta ilaa da'da 5

Maxaan ka helayaa WIC?

- Waxbarashada ku saabsan nafaqada
- Waxbarashada iyo taageerada ku saabsan naasnuujinta
- Cuntooyinka caafimaadka leh sida badarka, ukunta, caanaha, cuntooyinka badarka ah ee buunshahooda wata, miraha iyo khudaarta iyo caanaha dhallaanka ee macdanta iron-ka lagu xoojiyay, sida Similac iyo Enfamil

Sideen ku heli karaa WIC?

Waxaad heli kartaa dheefaha WIC haddii aad:

- Buuxiso baahiyaha dakhliga. Tani waxay ka dhigan tahay inuu dakhligaagu yahay ama ka hooseeya 185% xadka faqriga ee federaalka. Qoyska afarta xubnood ka kooban, dakhligiisu waa \$55,500 sanadkii ama \$4,625 bishii.
- Tahay degane Ohio.
- Dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad oo kale u maleynayo in adiga ama carruurtaada aad u baahan tihiin.

Sawir koodhka QR-ka si aad u hesho rugta caafimaadka WIC ee deegaankaaga.



Barnaamijka Mucaawanada Nafaqada Kabka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP)

Barnaamijka SNAP wuxuu kaa caawinayaa inaad soo iibsato cunto caafimaad leh. Dadka isticmaala SNAP waxay haystaan lacag la soo geliyay kaadhka Ohio Direction. Wuxuu la mid tahay kaadhka deynta ee aad dukaanka ku isticmaasho.

Sideen ku heli karaa SNAP?

Waxaad heli kartaa dheefaha SNAP haddii aad:

- Buuxiso baahiyaha dakhliga. Tani waxay ka dhigan tahay in waxa lagu siiyo bil kasta ama ka hooseeya 100% (ka dib jaritaanada) ilaa 130% (ka hor ka jaritaanada) ee xadka saboolnimada ee federaalka. Qoyska ka kooban afarta xubnood, dakhligoodu waa \$3,250 (ka dib ka jaritaanada) ilaa \$4,625 (ka hor ka jaritaanada) bil kasta.
- Tahay muwaadin Maraykan ah ama degane sharci ah.

Sawir koodhka QR-ka si aad wax badan u barato ama u codsato.

